FAAFINTA RASMIGA

الجريدة الرسمية

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA
## لولاية أرض بونت الصومال

**Sanadka 16.5-aad. Garowe 26. Decembe. 2014** **Lam.12**

**Faafinta bil walba soo baxda** **جريدة الشهرية**

***Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland***

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**

**Ansxinta Degmada Saaxo ee Gobolka Mudug.**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

**Waxba ma leh**

***Sharc Lr.7. ee 26/12/2014, kuna saabsan Ansixinta Degmada Saaxo ee Gobolka Mudug***

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

**Sharci Lr.7. ee December 25. 2014, kuna saabsan Ansixinta Degmada Saaxo ee Gobolka Mudug.**

**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPLS/129/20114 ee taar. 18/12/2014;

Markuu tixgeliyey:Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.;

## Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

### Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen degmada saaxo ee Gobolka\ Mudug.

### Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPLS;

### Qodobka 3-aad

Dhaqangalka Sharcigani wuxuu noqonayaa marka Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

**Dr. Cabdiweli Maxamad Cali Gaas**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

**DAWLADDA PUNTLAND** ولاية بو نت لاند الصومال

**EE SOOMAALIYA**

**GOLAHA WAKIILADA** مجلس النواب

**Xafiiska Guddoomiyaha**

**Office of the Speaker**

---

***Ref:*- XGGW/DPL/129 /2014** **Garoowe, Khamiis** **Date:- 18/12/2014**

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

Ujeeddo:- **Ansixinta Degmada Saaxo ee Gobolka Mudug**

**Guddoommiyaha Golaha Wakiilladdu:-**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | Dastuurka DPL qodobkiisa 64.5 |
| MARKUU ARKAY:- | Soo gudbinta Madaxweynaha ee Ref MW/DPS/548/2014 ee Dec/12/2014 kuna saabsan Magacaabista Degmada Saaxo |
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Baahida loo qabo ansixinta magacaabista Degmada Saaxo ee Gobolka Mudug |
| MARKUU DHEGAYSTAY:- | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada ee 17 December, 2014 |

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

Ansixinta Degmada Saaxo ee Gobolka Mudug.

**GUUL EEBBE**

**Md. Siciid Xasan Shire**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL**

Guddomiyaha Golaha Wakiiladda
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

---

Xaaji Gurxan oo aad u magacawday Wasiirudawlaha Madaxtooyada iyo Xiriirka Gobolada. Tallaabadaas waxaan u aragnaa inay tahay bilow fiican oo ay ku tallaabsatay dawladda aad madaxda ka tahay. Waxaan kaloo rumaysanahay in aanaan qayb muuqata ka noqon Karin horumarka iyo horusocodka Puntland haddi aysan jirin Degmo uu ka muuqato horumarkaas iyo ka-qaybgalka Dawladda Puntland.

Sidaas awgeed Mudane Madaxweyne, Madaxweynaha Dawladda Puntland ee Soomaaliya, waxaan kaa codsanaynaa in aad Degmo buuxda noogu magacawdo magaalada Saaxo ee Gobolka Mudug. Magaalada Saaxo waxay leedahay tilmaamaha soo socda:

- 70km Galbeed waxay kaga beegantahay Gaalkacyo ee Caasimadda Gobolka Mudug.
- 40km Koonfur-Galbeed waxay kaga begaan tahay Degmada Galdogob ee Gobolka Mudug.
- 45km Waqooyi waxay kaga begaan tahay Magaalada Galinsoor ee Gobolka Galgaduud.
- 55km Bari waxay kaga beegantahay Magaalada Dhabbad ee Gobobla Galgaduud.
- 95km Bari waxay kaga beegantahay Degmada Caabudwaaq ee Gobobla Galgaduud.
- 25km koonfur waxay kaga begaan tahay Magaalada Dhudub ee Gobolka Doollo, ee Dawladda Deegaanka Soomaalida Itoobiya.

Ugu danbeyntii, Mudane Madaxweyne, waxaan rajeynaynaa inaad tixgalin doonto codsigayaga ah inaad ***Degmo Buuxda u magacawdo Saaxo oo ka tirsan Gobolka Mudug***.

Mahadsanid

**Saxiixayaasha Codsiga:**

1. Nabaddoon Xasan Cilmi Jaamac
2. Nabaddoon Aadan Ciise Dhicisaw
3. Nabadoon Xayir Maxamed Warsame
4. Nabaddoon Salaad Warsame Jaamac
5. Nabaddoon Duraan Cismaan Maxamuud
6. Caaqil Bootaan Qoorcadde
7. Caaqil Daahir Warsame Jaamac
8. Caaqil Cismaan Xaashi Diirshe
9. Caaqil Buldhe Calas Nuur
10. Pro C/Raxmaan Shiikh C/Laahi
11. Ismaaciil Shiikh Yuusuf Sh. Ibraahim
12. Col. Cali Cigaal Jaamac Gurey

# DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

**15/04/2014**

**KU: Madaxweynaha Dawladda Puntland ee Soomaaliya, mudane C/Weli Maxamed Cali Gaas**

**OG: Maxadxweyne Ku Xigeenka Dawladda Puntland, mudane C/Xakiim C/Laahi Xaaji Cumar Camey**

**OG: Guddoomiyaha Baarlamaanka Puntland, mudane Saciid Xasan Shire**

**Ujeeddo: <u>CODSI MAGACAABIS DEGMADA EE MAGAALADA SAAXO</u>**

Anaga oo ah nabaddoonada, odayshaasha, culimada, aqoonyahanada, ganacstada, haweenka, iyo dhilinyarada, Beesha Maxamed Amaanreer (Wagardhac), ee Sade Daarood, kana mid ah beelaha dega deegaanada Dawladda Puntland ee Soomaaliya, gaar ahaan Gobolka Mudug, waxaan ka mid nahay beelaha ugu facaweyn ee dega Puntland kuna leh taariikh iyo xadaarad dheer, kalana qaybqaatay weilna la qaybsada beelaha kale ee aan wada dhalanay ee deegaanka deggan dhammaan xaaladaha soo wajaha bulshoweynta reer Puntland.

Mudaned Madaxweyne, Kadib muddo 14 sano ah oo ay dhisnayd Dawladda Puntland ee Soomaaliya, muddadaas oo ay gaartay horumar iyo waxqabad muuqda oo la taaban karo, islma markaasna uu yimid isbeddel doonka aad adigu horseedka ka ahayd, waxaan go'aansanay in la gaaray xilligii ay Beesha Maxamed Amaanreer (Wagardhac) si toos ah uga qaybqaadan lahayd horumarka Dawladda Puntland. Sidaas awgeed waxaan la shirnay dhammaan isimada Puntland ee ku sugnaa Caasimadda Garowe si ay u soo xulaan xildhibaanada Golaha Wakiilada, waxayna dhammaantood isku raaceen in ay beeshu ka mid tahay beelaha dega isla markaana taariikhda ku leh deegaanada Puntland ayna muhiim tahay inay ka mid noqdaan Maamulka Dawladeed ee Puntland.

Mudane Madaxweyne, waxaan kaaga mahadcelinaynaa tallaabada geesinimada iyo waxgaradnimada leh ee aad Golaha Wasiirada ugu soo dartay Mudane Bashiir C/Raxmaan